

Wargeyska Mountain View

Abriil 5, 2017

Jimco, Abriil 7.....Ardayda Waxaa La Sii Daayaa 12:40

Isniin, Abriil 10 - Jimco, Abriil 14.....Ma Jiro Dugsi, Fasaxa Guga (Spring Break)

Talaado, Abriil 18.....Shirka Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:30, CLC Qolka 182

Fariinta Agaasimaha

Dugsiga Mountain View, waxaan jecel nahay in aan ku fakarno in aan leenahay dugsiga ugu fiican magaalada. Waxaan qabnaa arday heer sare ah, macalimiinm daneeya, iyo waalidiin iyo qoysas heer sare oo caruurtooda ku taageeraa waxbarashadooda. Waxaa sharaf noo ah in aan nahay Eagles!

Hal siyaabo aan barno ardayda in ay ku muujiyaan sharafta ay u hayaan dugsigooda waxay tahay in ay qashinka ku shubaan qasacyada gashinka baddalkii ay ku tuuri lahayeen dhulka ama dibadda. In aan adkeyno nadaafadda dugsigena waxay muujisaa sharafta aan u hayno dugsigena. Waxaan dhamaan jecelnahay in aan ka shaqeyno meel ammaan ah, nadiif ah, oo qurxoon.

Waxaan mahad celin balaaran u haynaa darajadena afaraad. Dhawaanahaan, marka aan ka soo noqday shir lagu qabtay dhismo kale oo ku yaal dagmada, waxaan arkay ardaydena darajada afaraad iyo macalimiinta oo soo aruuriya qashinka agagaarla dugsigena. Waxay dugsigena ka dhigeen heer sare, iyo waxay muujiyeen inta ay daneyaan dugsigooda. Mahadsaniid darajada afaraad, kaalmada aad geysateen, xushmadda, mas'uuliyadda, iyo daryeelka. Waxaad Mountain View ka dhigtaan meel wanaagsan.

Tartanka Fanka Mountain View

Gugaan, waxaan qaban doonaa tartanka fanka. Fikradda tartankena fanka waa "Ku Dhaqan Sharciga Dahabiga." Sharciga Dahabiga waa in loola dhaqmo dadka kale sida aad adiga rabtid in laguula dhaqmo. Ardayda waxay ka qeybgeli karaan fanka qeybaha soo socda: dheesha, safafka dheesha, suugaanta, soo saarka muusikada, sawirada, iyo fanka la daawado. Ardayda waxay geli doonaan mid ka mid ah labada qeyb, pre-K ilaa darajada labaad ama darajada saddaxaad ilaa darajada shanaad. Si ay u galaan, ardayda waa in ay fankooda u gudbiyaan macalinka fasalkooda ugu dambayn dhamaadka maalin dugsiiyeedka, bisha Maajo 12. Waxaan rabnaa in qof kasta uu ogaado imanka si ay u helaan waqti ku filan oo looga shaqeeyo gelitaankooda. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, ama koobi kale oo ku saabsan sharuudaha, waxaad arki kartaa Mr. Elliott oo laga helo Qolka 102 ama waxaad weydiin kartaa xafiiska weyn.

Shirka Agaasimeyaasha iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qaban doono Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Abriil 18, marka ay tahay 8:15. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.